# Kalfadhiga Macluumaadka Provider Hub | Sebtembar 2025

Qoraalkan waxa uu ka kooban yahay xiriiriyeyaashii la wadaagay intii lagu jiray Kalfadhiga Macluumaadka Provider Hub ee khadka tooska ah oo la qabtay Talaaddada, Sebtembar 9, 2025. Diiwaangelinta kalfadhiga — oo ay ku jiraan su'aalihii ka qaybgalayaasha iyo jawaabihii soo-bandhigayaasha — iyagana waa la heli karaa.

Haddii aad qabto su'aalo raac ah, ama haddii aan waqtigu noo saamixin inaan si toos ah uga jawaabno su'aashaada inta kalfadhiga socday, waxaad soo diri kartaa email kooxda Provider Hub providerhub@state.mn.us.

## Xiriiriyeyaasha Macluumaad Dheeraad ah

- **Bogga Provider Hub:** Waxa ku jira qaybo ku saabsan wargeyskayaga, kalfadhiyadan macluumaadka ah, warbixinnada sii-daynta, cusboonaysiinta ku saabsan hirgelinta shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska iyo waxyaabo kale oo badan!
- **Macluumaadka barnaamijka/xeerarka ee ku saabsan astaamaha hadda ku jira Provider Hub:**
  - Shatiga/shahaadada daryeelka carruurta: Department of Children, Youth, and Families (DCYF) Licensing Division
  - Ka qaybgalka Barnaamijka Lacagta Taageerada Great Start Compensation: Barnaamijka Lacagta Taageerada Great Start Compensation, Su'aalaha Badanaa la Isweydiiyo (FAQs) ee barnaamijka iyo wararka cusub iyo ka-qaybgalka barnaamijka
  - Maamulka diiwaangelinta bixiyeyaasha Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Carruurta (CCAP): Macluumaadka Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Carruurta ee loogu talagalay kuwa bixiya daryeelka carruurtar iyo isbeddellada dhawaan ku yimid habka diiwaangelinta bixiyeyaasha CCAP



*Updated 10/13/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

- **Systems Transformation initiative:** Provider Hub waxa **uu qayb ka yahay** hindisahan, kaas oo diiradda saaraya isticmaalka teknoolojiyadda si loo abuuro khibrado waxtar badan, fudud oo loo siman yahay oo loogu talagalay bixiyeyaasha adeegyada bulshada iyo shaqaalaha dawladda.
- **Child Care Regulation Modernization projects:** Provider Hub **qayb kama aha** mashaariicdan. Halkii, mashaariicda casriyeynta xeerarku waxay taageeraan horumarinta (1) nidaamyada tilmaamayaasha muhiimka ah ee kormeerada gaaban; (2) nidaamyada ku saleysan halista oo heerar leh ee jebinta xeerarka; iyo (3) heerarka shatiga oo dib loo eegay.
- **Technology Resources Learning Library:** Waxa ku jira agab iyo macluumaad ka caawinaya bixiyeyaasha inay dhisaan xirfadaha teknoolojiyadda iyo kalsooni ku adeegsigeeda. Waxa lagu heli karaa English, Spanish, Somali, iyo Hmong.
- **Ku dar Isticmaale iyo Beddel Helitaanka Isticmaalaha Hadda Jira (PDF):** Waa ilo kaa caawinaya inaad hubiso in qof kasta oo ka tirsan ganacsigaaga daryeelka carruurta uu yeesho akoon Provider Hub u gaar ah oo leh helitaanka saxda ah.
- **Ma jiraa Isticmaale hadda u baahan caawimaad ku saabsan Provider Hub?** Gudbi kiis taageero marka aad ku jirto Provider Hub ama wac 651-431-6075. Koox taageero oo maxalli ah ayaa uga jawaabta kiisaska Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxaysa 8 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo.

## Hel Macluumaad Dheeraad ah

Kalfadhiga xiga ee Macluumaadka Provider Hub waxa si ku-meel-gaar ah loogu qorsheeyay Noofembar 2025. Faahfaahinta — oo ay ku jiraan taariikhda, waqtiga, iyo xiriiriyaha diiwaangelinta — waxa lagu dari doonaa wargeyskeena Oktoobar sidoo kalena waxa lagu dhejin doonaa boggayna.

## Ku Saabsan Provider Hub

Provider Hub waa aalad onleen ah oo loogu talagalay bixiyeyaasha adeegyada bulshada si ay ugu dalbadaan uguna maareeyaan shatiyada, maalgelinta iyo barnaamijyada kale ee dawladda. Provider Hub waxa lagu isticmaali karaa kombuyuutar, tablet ama taleefan casri ah. Waxa lagu heli karaa English, Spanish, Somali iyo Hmong.



*Updated 10/13/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

Dowladda Minnesota waxay sii waddaa hagaajinta aaladdan onleenka ah iyo dhisidda astaamo cusub. Markaan taas sameyno, bixiyeyaasha dheeraadka ahi waxay heli doonaan adeeggan. Booqo bogga [Provider Hub](#) si aad u hesho faahfaahin.



*Updated 10/13/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*

*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*